



Scotland's Census

Shaping our future

A' dealbhadh ar n-àm ri teachd

# Haggaha Tirakoobka Scotland 2022



**Tirakoobka Scotland.**

Waxa saxda samee, ku bilow adoo buuxinaaya taas.

Aad [census.gov.scot](https://census.gov.scot)



## Waa maxay tirakoobku?

Tirakoobka Scotland ayaa ah habka rasmiga ah ee lagu tirinaayo qof kasta iyo qoys kasta oo dalka jooga. Waxa sida caadiga ah la sameeyaa 10 sanoba hal mar. Waxyaalaha la isku weydiyo tirakoobka ayaa waxa ka mid ah su'aalaha khuseeya da'da dadka, jinsiga, guriga iyo xaalad nololeedka, shaqada, waxbarashada iyo shahaadooyinka, iyo sidoo kale isirka/asal ahaan meesha uu qofku ka soo jeedo

In tirakoobka la buuxiyo ayaa muhiim ah maxaa yeelay waxay jawaabuhu Scottish Government, iyo adeeg bixiyayaal kale siinayaan xogta ay u baahan yihiin si ay ugu gaadhaan go'aano muhiim ah ee nololsha dadka iyo bulshadaba saameynaaya.

Waxa go'aamadaas ku jira sida lacagta loogu isticmaalayo adeegyada muhiimka ah ee mujtamaceena/bulshadeena, sida waxbarashada, guriyeynta, daryeelka caafimaadka, wadooyinka iyo tareenada, iyo waxyaalo kale oo badan.

## Waa goorma Maalinta Tirakoobku?

Maalinta Tirakoobku waa Axadda 20 Maarso, laakiin waxaad awoodi doontaa inaad tirakoobkaaga internetka (online) ka buuxiso isla marka aad warqadaada heshoba. Hase yeeshee waa inay jawaabuhu qoyskaaga ka tarjumayaan xaaladda qoyskaaga ee maalinta Axadda 20 Maarso.

## Sidee ayaan tirakoobka u buuxiyaa?

Waxaad tirakoobkaaga ka buuxin kartaa internetka ama adigoo nuqul warqad ah dalbanaaya. Marka dhammaadka Febraayo 2022 laga bilaabo, ayay qoysasku heli doonaan warqad ay la socdaan tilmaamo ku saabsan siday tirakoobkooda internetka ugu buuxinayaan.

Waxay in tirakoobka internetka laga buuxitaa furmi doontaa marka laga billaabo 28 Febraayo ayuu furmi doonaa in tirakoobka laga buuxiyo internetka.

1. Booqo [www.census.gov.scot](http://www.census.gov.scot)
2. Guji **START**
3. Geli Koodhka khaaska ah ee aad ku Galayso Internetka ee warqadda aad heshay ku yaala
4. Raac tilmaamaha shaashada ku dhigan

Haddii aad rabto inaad nuqul warqad ah dalbato, ama haddii aad u baahan tahay Koodhka khaaska ah ee aad ku Galayso Internetka, aad [census.gov.scot](http://census.gov.scot) ama khadka caawimada ka soo wac telefoonka **0800 030 8308**.

## Ma inaan buuxiyaa?

Haa. Qoys kasta oo Scotland jooga waxa saaran masuuliyada sharci oo inay su'aalaha tirakoobka buuxiyaan ah. Tani waa mid muhiim ah in la hubiyo in tirakoobku uu bixiyo xog faahfaahsan oo sax ah oo qaranka oo dhan ku saabsan.

Qofka ama ku nool, ama leh, ama kiraystay guriga ama biilasha qoyska bixiya ayay masuuliyadi ka saran tahay inuu tirakoobka buuxiyo. Haddii aad degan tahay, guryaha dadka waaweyn lagu daryeelo, hoolalka la dego ama hostel-lada, oo aad 16 sano jir ka weyn tahay ayaad u baahnaan doontaa inaad tirakoob gaar ah/shakhsi ahaaneed buuxiso iyo inaad sidoo kale ka qeybqaadato su'aalaha laga buuxinaayo meesha dadweynaha wadaago.

## Ka waran haddii aanan su'aalaha fahmaynin?

Marka bogga internetka ee laga buuxinayaa ee ([census.gov.scot](https://www.census.gov.scot)) uu furmo laga bilaabo 28 Febraayo ayaad awoodi doontaa inaad booqato oo aad hesho tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan sida su'aal kasta ee luqadaha hoos ku yaala looga jawaabo. Waxa sidoo kale jira taageero luqada oo kale oo laga heli karo khadkayaga caawimada ee **0800 030 8308**.

Carabi	Gaelic	Mandarin	Ruush
Cantonese	Hindi	Booishi	Slovak
Czech	Kurdi	Bunjaabi	Turki
Faarisi	Lithuanian	Roomaani	Urduu

## Ka waran haddii aan curyaanimo/naafonimo leehay?

Waxaanu la shaqaynaa kooxo curyaamiinta/naafada oo kala duwan si aanu u hubino in tirakoobku yahay mid ilaa inta ugu badan ee suurtoogalka ah la heli karo. Haddii aad taageero u baahan tahay ama aad rabto nuqul su'aalaha oo qaab kale ah fadlan la soo xiriir xarunta xidhiidhka ama aad [census.gov.scot](https://www.census.gov.scot). Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa daryeelo, saaxiib ama qof qaraabo ah inuu adiga tirakoobkaaga kuu buuxiyo.

Haddii aad dhibaatooyin xagga maqal ama hadal ah leedahay, fadlan isticmaal adeegga gudbinta qoraalka ee **18001 0800 030 8308**.

## Ma amaan baa macluumaadkeyga tirakoobku

Haa. Ka hor inta aananu xogta tirakoobka daabacin, ayaanu ka saarnaa dhamaan macluumaadka shakhsi ahaaneed si aanu ugu hubinno in aan shakhsiyaadka jawaabaha laga soo dhex saari karin. Xogta tirakoobka ayaan la daabic doonin muddo ilaa 100 sano ah iyadoo ay dawladda ka go'an tahay in la yareeyo dadka heli kara.

## Haddii aan wali caawimo u sii baahanay?

Xaruntayada lala soo xidhiidhaayo ayaa la furi doonaa laga bilaabo 28 Febraayo iyadoo telefoon kasta oo guriga ama ka gacanta bilaash loogaga soo wici doono **0800 030 8308**. Waxaad sidoo kale kala soo xidhiidhi kartaa ku sheekeysiga internetka [census.gov.scot](https://www.census.gov.scot).

## Tirakoobka Scotland.

Waxa saxda samee, ku bilow adoo **buuxinaaya taas.**

Aad [census.gov.scot](https://www.census.gov.scot)

